


### Waa maxay Goobaha Dadweynaha?

- Goobaha dalxiiska ee dadweynaha
- Goobaha hooyga, ila iskuugu imaado, ama maaweelada
- Dugsiyada dadweynaha
- Mac'hadyada u furan dadweynaha inay ku qabsadaan munaasabad ama kulan
- Goobaha taageerada, oo ay ku jiraan xafiisyada dowlada, bakhaarada, moolasha dukaameysiga, tiyaatarada, maktabadaha, isbitaalada, iyo xarumaha boosteejada.



### SIDA KU XUSAN RCW (Revised Code of Washington, Xeerka Sharciyada Joogtada ah ee Washington) 49.60.215, GOOB DADWEYNE:

- Ma iidi karto ama ma hakin karto soo gelidda.
- Ma soo dalaci karto sicir gooni ah ama ma bixin karto qoddobo iyo shurrudo shaqo oo gaar ah.
- Ma mamnuuci karto soo xareynta xayawaanka adeegga.
- Ma gudbin karto wax su'aal ah oo la xiriirta shaqo la codsaday oo takoor leh.

Washington Law Against Discrimination (Sharciga Washington ee Lidka Ku ah Takoorka) uma baahna isbaddelo qaabdhismeed, dayactir, ama wax ku darid si looga dhigo goob kasta mid uu geli karo qof naafo ah marka laga reebo sida kale ee sharciga uu farayo.

Dhaqanka ama ficilada u horseedaya halis ku timaada dhismaha ama shaqsiyaadka ayaa sabab u noqon karta diidmo waana inuusan ka mid ahayn dhaqan cadaalad darro ah.



### Dadka Sida Gaarka ah Takoorka looga Ilaaliyo ee

#### Goobaha Dadweynaha waxaa ka mid ah:

- Isirka/Midabka
- Asalka Qaran
- Muwaadinnimada/Xaalada Degenansho
- Caqiidada
- Jinsiyada/Uurka
- Nooca Jinsiga/Aqoonsiga Jinsiga
- Xaaladda Halyeey Ciidan/Militari
- Muuqashada wax Naafinimo dareen, maskax, ama mid jireed ah- Mid dhab ah ama mida la isku liido
- Isticmaalka xayawaanka adeegga
- HIV ama Cagaarshowga C

WSHRC (Washington State Human Rights Commission, Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington) awood uma lahan ay wax kaga qabato adeegyada ama hay'adaha qaar, oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobneyn:

- Ficilada booliska
- Go'aanada maxkamada, magaalada, iyo gudoomiyaasha degmooyinka, ama hay'adaha kale ee maamulka ama shatiyeynta
- Boggaga internetka
- Diidmada dheefaha dadweynaha
- Taageerada ilmaha
- Booqashada ay maxkamada amartay
- Xabsiga iyo jeelasha iyo barnaamijadooda maxaabiista
- Adeegyada ilaalinta ee ilmaha ama dadka wawayn
- Qabiilada Mareykanka ee Dhaladka ah
- Dawlada federaalka



Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington wuxuu ka shaqeyaa inuu ka hortaggo oo uu suuliyiyo takoorka iyada oo loo marayo baaritaanka dacwadaha, noocyada khilaaf xalinta, iyo hawlaha waxbarida, tababarka iyo gaarsiinta.

### Hannaanka Dacwada

Qof kasta waxaa waajib ka saaran inuu u hoggaansamo sharciga wuxuuna xaq u leeyahay inuu xaalmarin raadsado marka uu dhib dhaco.

Dacwadaha xadgudubyada RCW 49.60 waa in lagu soo gudbiyo lix bilood gudahooda taariikhda uu dhibka dhacay, marka laga reebo kiiska takoorka uurka, kuwaas oo ay tahay in lagu soo gudbiyo hal sano gudahiisa. Dacwadaha ayaa la xalin karaa inta lagu jiro baaritaanka iyada oo ku xiran heshiis dhex mara kooxaha is haya iyo WSHRC. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hannaanka dacwada, booqo boggeena internetka ama la xiriir mid ka mid ah xafiisyadeena si aad ula hadasho sargaalka qaabilaada.



### ADEEGSIGA SHARCIGA EE CADAALADA AH

Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington waa hay'ad sharci fulin oo dhexdhexaad ah, xaqiiq doon ah; cidna uma doodo inta lagu jiro baaritaanka, balse waxay u doodaan sharciga iyada oo looga dan leeyahay in laga hortago oo la suuliyo takoorka.

### Goobaha Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington

#### **XARUMAHA WAAWAYN**

711 S. Capitol Way, Suite 402  
P.O. Box 42490  
Olympia, Washington 98504-2490  
360-753-6770

#### **SPOKANE**

Rock Pointe Plaza III  
1330 N. Washington Street, Ste 2460  
Spokane, Washington 99201

#### **YAKIMA**

1205 Ahtanum Ridge Dr., Suite C  
Union Gap, WA 98903

#### **WENATCHEE**

519 Grant Rd  
East Wenatchee, WA 98802



**WASHINGTON STATE  
HUMAN RIGHTS COMMISSION**  
It's Not Justice If It's Not Equal

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheerad ah, aad qabto su'aalo dheeraad ah, ama aad rabto inaad tabbabar u qabato hay'adaada, fadlan kala xiriir WSHRC lambarka 360-753-6770 ama 800-233-3247. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan midan iyo arrimaha kale ee xuquuqaha madaniga ah waxaa laga heli kaa boggeena internetka ee barta

[www.hum.wa.gov](http://www.hum.wa.gov)

### **Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington**



### **Takoorka Goobaha Dadweynaha**

*Himilada Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington waa inuu ka hortago oo uu suuliyo takoorka iyada oo loo marayo adeegsiga sharciga ee cadaalada ah, isticmaalka kheyraadka ee hufan, iyo gacansaar la yeelashada bulshada ee waxtarka leh.*